

Qaaxada (TB) oo laga baaro dhiigga (IGRA)

Waa maxay qaaxada(TB) oo laga baaro dhiigga?

Qaaxada oo laga baaro dhiigga, loona yaqaan Interferon Gamma Release Assay ama IGRA, waa hab lagu ogaado haddii jeermiga qaaxadu jirkaaga ku jiro. Qaaxada ayaa laga baari karaa dhiigga intii maqaarka laga baari lahaa (Mantoux).

Waxaa jira laba nooc oo qaaxada looga baaro dhiigga:

- QuantiFERON®-TB
- T-SPOT®.TB

Waa in dhiiggaaga (ama maqaarka) laga baaraa qaaxada haddii aad:

- marar badan u dhowaatay qof qaba qaaxo,
- ku noolayd dal dad badani qabaan qaaxo
- ka shaqayso ama ku nooshahay guryaha dadka lagu xanaaneeyo, rug caafimaad, isbitaal, xabsi, hoyga dadka aan guryaha lahayn, ama
- aad qabto cudurka HIV ama habdhiska difaaca jirkaagu uusan xoog lahayn.

Caruurta ka da' yar shan sano ee qaaxada laga baarayo waa in laga baaraa maqaarka intii dhiigga laga baari lahaa.

Sidee baan u heli karaa in qaaxada laga baaro dhiigga?

Waydii takhtarkaaga. Waxaa lagaa qaadayaa xoogaa dhiig ah markaas ayaa loo dirayaa shaybaar. Takhtarkaagu waa in uu kuu sheegaa haddii jawaabtu tahay “negative(ma qabtid)” ama “positive (waad qabtaa)” dhawr maalmood gudahood.

Ka waran haddii jawaabta qaaxada laga baaro dhiiggu noqoto “negative(ma qabtid)”?

Jawaabta qaaxada laga baaro dhiigga oo noqota “negative” macnaheedu badanaaba waa jirkaaga jeermiga qaaxadu kuma jiro.

Ka waran haddii jawaabta qaaxada laga baaro dhiiggu noqoto “positive(waad qabtaa)”?

Jawaabta qaaxada laga baaro dhiigga oo noqota “positive” macnaheedu waa in ay suurtagal tahay in jeermiga qaaxadu ku jiro jirkaaga. Dadka jawaabtoodu noqoto “positive” badankoodu waxay qabaan infakshanka qaaxada oo qarsoon. Si loo hubiyo takhtarkaagu wuxuu samaynayaa baaritaan wuxuuna kuu dirayaa raajo. Waxaa laga yaabaa in aad u baahato in baaritaano kale la sameeyo si loo ogaado in jeermiga jirkaaga ku jira uu yahay infakshan qarsoon ama in uu yahay mid cudur kugu noqday

Waa maxay infakshanka qaaxada ee qarsoon?

Qaaxadu waxay martaa laba heer. Labada heerba waa la daawayn karaa.

Marka jeermiga qaaxadu jirkaaga galo wuxuu noqdaa infakshan qarsoon. Haddaan la daawayn, infakshanka qaaxada ee qarsoon wuxuu kugu noqon karaa cudurka qaaxada.

Heerka 1aad – Infakshanka Qaaxada Qarsoon	Heerka 2aad 2 – Cudurka Qaaxada
Jeermiga qaaxadu waa mid ku “qarsoon” jirkaaga. Heerkaani wuxuu socon karaa wakhti dheer – xittaa sanado badan.	Jeermiga qaaxadu waa mid cudur noqday oo fidaya. Wuxuuna waxyeelo u geysanayaa xubnaha jirkaaga.
Uma ekid isumana haysatid qof cudur qaba ama jirran. Raajada feeruhu badanaaba waa mid caadi ah.	Caadi ahaan waxaad tahay qof jirran. Takhtarkaagu wuxuu samayn doonaa baaritaano gaar ah si loo ogaado meelaha qaaxadu waxyeelada u gaysatay ee jirkaaga.
Dadka kale qaaxada ma qaadsiin kartid.	Haddii jeermiga qaaxadu sambabada kaa galay, waxaad dadka kale qaaxada ku qaadsiin kartaa adiga oo qufaca, hindhisa, hadala, ama heesa.
Badanaaba waxaa lagu daaweeyaa iyada oo la qaadato hal daawo 9 bilood.	Waxaa lagu daaweeyaa iyada oo la qaato 3 ama 4 daawo ee qaaxada ugu yaraan 6 bilood.

Ka waran haddii aan horay u qaatay tallaalka BCG?

Tallaalka BCG (tallaalka qaaxada) waxaa laga yaabaa in uu caruurta yaryarka ah ka difaaco in ay aad ugu bukoodaan qaaxada. Difaacani waa dhamaada marka dadku koraan.

Dadka qaatay tallaalka BCG waa qaadi karaan infakshanka qaaxada qarsoon iyo cudurka qaaxadaba.

Haddii aad qaadatay tallaalka BCG oo lagu kala doorsiiyo in qaaxada laga baaro dhiigga iyo in laga baaro maqaarka, waxaa fiican in aad doorato in qaaxada dhiigga laga baaro. Sababtu waxay tahay qaaxada oo laga baaro dhiiggaaga waxaa kaliya oo ay “positive” noqonaysaa haddii uu jeermiga qaaxadu ku jiro jirkaaga.

Ilaali caafimaadkaaga iyo caafimaadka goyskaaga – qaaxada ka baar dhiiggaaga!

